

Ethambutol (EMB)

Somali



Buugga tilmaamaha dawooyinka (TB da)

Waa maxay Ethambutol?

Ethambutol (EMB) waa dawo antibiyotik ah ee llagu daweyo cudurka qaaxada da (marka lala qaato dawooyinka kale)

Jeermiga TB da waa mid dhib badan sida loo daweyyana adagtahay. Waa in aad qaadataa dawadan mudo laba billod iyo ka badan si loo cirib tiro jeermiga TB da. Takhtarkaada ayaa go'aaminaayo inta billod aad qaadanaysid dawada.

Sidee baan u qaataa dawadan?

- Waa muhim in aad maalin kasta qaadatid dawada **ama** sida uu takhtarkaada ku faray
- **Isla markiiba ogeysii takhtarkaada marka aad joojisid qaadashada dawada**
- Haddii aad ilowdo qaadashada qeyb dawo ah, qaado sida ugu dhaqsiyaha badan, marna ha isku wada qaadan laba qeyb oo dawo ah
- Adoo dhergan ama gaajoonba waad qaadan kartaa dawadan
- Ku keydi dawada EMB da meel qabow oo qalalan
- La socodsii takhtarkaada dawooyinka kale ee aad qaadatid ama kuwa aad hadda bilowday ba

* Waxaa laga yaabaa in aad dawadan qaadati hal jeer ama laba jeer maalintii, hadba sida u u takhtarkaadu cayimo.

* Haddii aad xaamilo tahay ama aad ilmo nuujinaysid la tasho takhtarkaada inta aadan dawadan qaadanin.

Waa kuwee calaamooyinka aan iska jiraayo?

- Waxaad u baahantahay in uu takhtarkaadu si joogta ah kuula socdo inta aad qaadanaysid dawada Ethambutolka
- **Calaamadaha caadi ga ah ee leysku arko waxaa ka mid ah:**
 - raashiin xumo
 - Calool xanuun
 - Nabro yar yar oo jirka ka soo yaaca
- **Haddii aad isku aragto calaamadahan soo socda qaarkood oo qatarta ah, jooji dawada takhtarkana waco**
 - EMB da waxay wax u dhimi kartaa aragga il ama labadaba. Haddii aad isku aragtid aragti xumo ama dareentid indhahaaga oo caweer gala, ama aragga midabyada oo kaa xumaada, si deg-deg ah ula xiriiir takhtarkaada
 - Haddii aad qaadatid dawadan muddo ka badan labo billod waxaad u baahantahay in aad u tagtid takhtarka indhaha si laguu baaro

Habka dawada TB da loo qaato

- Qaado dawada waqti go'an maalin kasta, sida:
 - Inta aadan jiifsan
 - Marka ugu horeeysa ee aad hurdada ka kacdid
- Isticmaal gasaca lagu qeybiyo daawada oo todobaadle ah
- Maalin kasta ee aad qaadatid kaniiniga ku calaamadeyso buuga jadwalka taariikhda
- Weydiiso qof qoyska ka mid ah ama saaxibkaa in uu ku xasuusiyo
- Tix gelin sii in aad raacdid barnaamijka Hubinta Qaadashada Dawada (DOT)

Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid dawooyinkaada ama TB da fadhlan la xiriiir takhtarkaada ama Toronto Public Health ee laga helo **416 338 7600**

E-mail: targettb@toronto.ca

Web site: www.toronto.ca/health/tb_prevention

